




Ilmo dameer ah



✎ Lindiwe Matshikiza

🔗 Meghan Judge

📄 Anwar Mohamed Dirie

😊 Somali

📖 Level 3

(imageless edition)



Storybooks Canada

storybookscanada.ca


Ilmo dameer ah

Written by: Lindiwe Matshikiza

Illustrated by: Meghan Judge

Translated by: Anwar Mohamed Dirie


This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons


[Attribution 4.0 International License.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0)


<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Gabar yar ayaa aragtay muuqaal aan la garaneyn oo masafo ka muuqdo.

Markii uu muuqaalki soo dhowaaday,
waxa ay aragtay in ay tahay haweeney
xaamilo culus ah.







Xishood laakiin geesi nimo, gabadhii waxa ay ku sii dhowaatay haweeneydii. “Waa in ay nala joogtaa,” ayay gabadha dadkeedii go’aansadeen. “Iyada iyo ilmaheedaba waa aannu nabad gelinaynaa.”




Ilmihi dameerka ahaa iyo hooyadii waa ay wada koreen waxa ayna heleen qaabab badan oo ay ku wada noolaan karaan midba midka kale dhiniciisa. Tartiib tartiib, dhinacyadooda oo dhan, qoysas ayaa bilaabay in ay soo dagaan.




Ilmaha ayaa soo dhakhso ba wadada soo
galay. "Riix!" "Bustayaal la kaalaya!"
"Biyo!" "Rii!!!xxxxx!!!"




Dameerkii waxa uu helay hooyadii, oo
cidlootay una barooranaysa ilmahedi!
lumay. Muddo dheer ayay is eegteen
midba midka kale. Dabadeedna ihabisi
siiyeen waliba si adag.




Laakiin markii ay ilmihii arkeen, qof walba gadaal ayuu argagax ugu booday.
“Dameer?!”




Ugu dambeyntii dameerkii waa uu ogaaday waxa in la sameeyo ah.




Qof waliba muran ayuu bilaabay. "Waxa aynnu ballan qaadnay in aan ilmaha iyo hooyadaba nabad gelyo siinno, waana in aan sidaas yeelnaa," qaar baa sidaa yiri. "Laakiin waxa ay noo horseedi doonaan nasib darro!" qaar kale ayaa sidaa iyana yiri.



... daruurihii ayaa la libdhay asaga iyo saaxiibkiis ba, odayga dupa ahaa.




Sidaa darteed haweeneydii way cidlowday mar kale. Waxa ay ka la yaabaneyd wixii ay ku sameyn lahayd ilmahan qaabka daran. Waxa kale oo ay ka la yaabaneyd wixii ay iyaduna isku sameyn lahayd.





Meeel kore oo daruuraha ka mid ah ayey hurdo kula dul dhaceen. Dameerkii waxa uu ku riyooday hooyadiis oo xanuunsanaysa oo isaga u yeeraysa. Markii uu toosay na...

Aakhirkii waxa ay isku qancisay in ay
aqbasho in uu ilmahedi! yahay, iyaduna
ay hooyadiis tahay.




Subax subaxyada ka mid ah, ayaa uu
odagi! weyddiistay Damerkii in uu u
qaado buur dhaladeed.






Hada, hadii uu dameerka ku joogi lahaa sidiisi, bar yaraanta, wax walbo waxaan ahaan lahaayeen si ka duwan sidan. Laakiin ilmihii dameerka ahaa wuu koray oo koray ilaa uu la ekaan waayay dhabarkii hooyadii. Si kasta oo uu isku deyay na, waa uu u dhaqmi waayey sidii dadkii oo kale. Hooyadii aad bay u daashay oo waa ay isku buuqday. Marmar waxa ay isku dayday in uu sida xayawaanka u shaqeeyo.




Dameerkii waxa uu raacay si uu ula joogo odagii, kaas oo baray qaabab kala duwan oo ah sida loo noolaado. Dameerkii waxa uu noqday mid wax dhageystay oo na wax bartay, sidoo kale ayuu sameeyay odaygana. Waa ay is caawiyeen, waa ayna wada qosleen si wada jir ah.




Jahawareer iyo carro ayaa iskuugu
darsantay damerkii. Sidan ma yeeli karo
sidaana ma yeeli karo. Sidan ma noqon
karo sidaana ma noqon karo. Mar uu aad
u xanaaqay, ayaa uu maalin hooyadii laad
ku kiciyey oo dhulka ku tuuray.



Damerkii waxa uu toosay isaga oo oday
la yaab leh hoos usoo eegayo. Indhihi
odayga ayuu eegay waxuu na billaabay
inyar oo rajo ah in uu dareemo.



Dameerkii ceeb ayuu dareemay. Waxa aanu bilaabay in uu aad u ordo oo uu u cararo meel fog.



Waqtigii uu joojiyay orodkii, habeen bay ahayd, Dameerkiina waa uu lumay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdigi uga dhex gunuunacay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdiga ka daba dhahay. Waaxuu ahaa mid cidloobay. Intuu isku duuduubay sidii kubad adag, ayuu la dhacay hurdo dheer oo dhiban.